# Daraasad Ku Saabsan Caafimaadka Galmada iyo Taranka iyo Naafada ee Xerada Qaxootiga Kakuma

Guddiga Haweenka ee Qaxootiga iyo Guddiga Caalamiga ah ee Badbaadinta
Nofeembar-Diseembar 2013

*WARBIXIN LOOGU TALAGALAY TABARRUCAYAASHA*

## CIDDA AYNU NAHAY?

Guddiga Haweenka ee Qaxootiga (WRC) waa urur aan dowli ahayn oo saldhiggiisu yahay Mareykanka. Waxaan nahay urur sameeya cilmi-baaris oo ka shaqeeya ilaalinta xuquuqaha, badbaadada iyo wanaagsanaanta bulshooyinka barakacay ee ku nool daafaha caalamka. Waxaan la shaqeynaa dowlado, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo ururrada caalamiga ah.

Guddiga Caalamiga ah ee Badbaadinta (IRC) waa urur aan dowli ahayn oo saldhiggiisu yahay Mareykanka, kaas oo adeegyo siiya dadka ay saameeyeen xaaladaha deg-degga ah ee bini'aadannimo ee ku nool daafaha caalamka. Hay'adda IRC waxay Kakuma ka bixisaa adeeg caafimaad, nafaqo,


*Kooxda Daraasadda sameysay*

**Caafimaadka Galmada iyo Taranka**

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay helitaanka macluumaadka iyo adeegyada ay u baahan yihiin si ay u daryeelaan caafimaadkooda la xiriira galmada iyo taranka. Waa ku jira barashada sida jirkooda uu u shaqeeyo marka ay qaan-gaar noqdaan, iyo sidoo kale sida loo yeesho xiriirro badbaadsan. Waxaa tan ku jira helitaanka hababka qorshaynta qoyska (kala fogaynta dhalmada) oo ah kuwo la aqbali karo oo badbaadsan, wax-tar leh, isla markaana la awoodi karo, sida kondam iyo kiniiniyo; helitaanka daryeelka caafimaadka ee ka caawiya dumarka inay helaan uur iyo dhalmo badbaado qaba; helitaanka adeegyada ay u baahan yihiin dadka ka badbaada rabshadaha galmada la xiriira; iyo helitaanka macluumaadka iyo adeegyada ku saabsan sida looga hor-tago, loona daryeelo cudurrada ku faafa galmada sida HIV.

adeegyada ka hor-tagga HIV, waxayna caawisaa xuquuqda aadanaha, xuuqda qaxootiga iyo in si siman loo helo adeegyada. IRC waxay kaloo taakulaysaa dadka naafada ah — oo ay ku jiraan kuwa qaba cudurrada dhimirka — iyadoo la siinayo baxnaanin bulshada ku saleysan, qalabka wax taageera iyo baxnaanin shaqo oo la siiyo carruurta.

## WAA MAXAY SABABTA AAN U NIMID XERADA QAXOOTIGA KAKUMA?

Waxaan u booqannay Xerada Qaxootiga Kakuma inaan ka fulinno daraasaad wax badan looga ogaanayo baahiyaha caafimaadka galmada iyo taranka iyo cabashooyinka dadka qaba noocyada kala duwan ee naafannimada (jirka, dareemaha, caqliga, maskaxda ama naafannimo dhowr ah). Waxaan kaloo rabnay inaan wax badan ka ogaanno waxyaabaha dadka naafada ahi ay u maleeyaan in loo baahan yahay sameyntooda si loo horumariyo xaaladda, oo ay ku jiraan waxyaabaha ayaga laftigooda ay sameyn karaan.

## MAXAAN SAMEYNAY MUDDADII AAN KU JIRNAY BOOQASHADEENNA?

Labo xubnood oo ka mid ah WRC ayaa booqday Kakuma in ka badan saddex toddobaad muddadii lagu jiray Nofeembar iyo Deceember 2013. Waxay la shaqeeyeen Kooxda Caafimaadka Dadweynaha ee IRC si ay u tababaraan 12 cilmi-baareyaal oo ka tirsan qaxootiga, ayna daraasad ka sameeyaan haweenka naafada ah ee da’dooda u dhaxayso 20-49, nimanka naafada ah ee da’doodu u dhaxayso 20-59 iyo gabdhaha iyo wiilashada naafada ah ee ku jira xilliga qaan-gaarnimada ee da’doodu u dhaxayso 15-19 ee ku nool Kakuma I, II iyo III.

Kooxda cilmi-baarista waxay la kulantay 114 qaxooti ah oo naafo ah-72 isugu jira haween iyo gabdho iyo 42 isugu jira niman iyo wiilal kuwaas oo qaba naafannimo jirka ah, mid caqliga ah, mid maskaxda ah, mid maqalka ah iyo naafannimo dhowr qeybood isugu jirta. Waxay la kulmeen qaxooti guryaha ku xanniban iyo sidoo kale daryeel bixiyeyaal iyo xubno ka tirsan qoysaska dadka naafada ah. Waxaa howlqabadyada lagu fuliyay luuqadaha af-Soomaaliga, Swahili, Carabi iyo Ingiriis. Qaar ka mid ah howlqabadyada waxaa loo sameeyay si koox koox ah, halka kuwa kalena lala fuliyay shakhsiyaad.

Markaan dhageysannay ka qeyb-galayaasha, waxaan wax badan ka ogaannay aragtidooda iyo khibradaha ay soo mareen. Waxaan ka mahad-

naqaynaa inaan la kulannay ayaga iyo inay noo ogolaadeen inaan wadaagno macluumaadka iyo sheekooyinka si mas'uuliyad ay ku jirto.

## MAXAAN BARANAY MUDADII AAN KU JIRNAY BOOQASHADEENA?

**Natiijooyin horudhac ah** ayaa muujinaya in, guud ahaan, dad ka tirsan kuwa naafada ah ay dareemaan in la xaqiro maadaama ay yihiin dad naafo ah. Ka qeyb-galayaal badan ayaa sheegay in loo baahan yahay in tixgelin badan la siiyo dadka naafada ah. Talooyinka ay bixiyeen waxaa ka mid ah in wadiiqooyin gaar ah loo sameeyo dadka naafada ah si ay awood ugu yeeshaan inay qaataan raashinka la qeybinayo, biyaha iyo adeegyada caafimaadka, halkii ay saf dheer la gali lahaayeen qof kasta oo kale. Dad kale ayaa ku taliyay dhismaha xarumo lagu daaweeyo jirka oo bulshada ay leedahay oo loogu talagalay dadka naafada ka ah xubno ka mid ah jirkooda si ay si sahlan ugu helaan adeegyada ay u baahan yihiin. Qaar ayaa sheegay in caawimaad dheeraad ah la siiyo dadka naafada ah sida waxyaabo aan cunto ahayn, sida lacag iyo dhar. Talo kale ayaa ahayd in la sameeyo xafiis si gaar ah loogu talagalay dadka naafada ah.

Qaar ka tirsan dadka naafada ah ayaa sheegay inay ku qanacsan yihiin adeegyada daryeelka caafimaadka. Hase yeeshee, dad badan oo naafo ah, gaar ahaan kuwa ku xanniban guryaha iyo dadka daryeelka ayaga ayaa ka cawday adeegyada caafimaadka oo aan ku filnayn. Kuwa badan ayaa sheegay in dhibka ugu weyn ee ay qabaan ay tahay **helitaan la'aanta adeegga turjumaada**, oo ay ku jiraan luqadaha calaamadaha jirka la iskula hadlo, halka kuwa kalena ay sheegeen in walaaca ugu weyn ee ay qabaan uu yahay **gaadiidka** ay u raacaan xarumaha caafimaadka. Arrintan ayaa si gaar ah caqabad weyn ku ah dadka naafada ah ee aan haysan aaladaha wax taageera, sida gaadiidka dadka curyaanka ah laga riixo, ulaha curyaanka iyo qalabka taageera maqalka dadka dhagaha culus. Qaar ka tirsan dadka xannaaneeya dadka naafada ah ayaa caddeeyay inay uga baahan yihiin adeeg bixiyeyaasha **macluumaad ka wanaagsan inta ay hadda bixiyaan oo ku saabsaan u dirista** daryeel dheeraad ah ee dadka ayaga ku tiirsan ay u baahan yihiin.



## FAHANKA QEYBAHA JIRKA IYO SIDA AY U SHAQEEYAN

Haweenka iyo gabdhaha waxay qeybaha jirka ee dumarka iyo sida ay u shaqeeyaan ka badiyeen qeybaha jirka ee

ragga iyo sida ay u shaqeeyaan. Sidaas si la mid ah, nimanka iyo wiilasha ayaa u muuqday inay si wanagsan u fahansanaayeen qeybaha jirka ee ragga. Carruurta ku jira xilliga qaan-gaarnimada ee naafada ah ee iskuullada dhigta ayaa u muuqday inay ka badiyeen dadka waa-weyn xubnaha taranka iyo shaqooyinkooda. Dad badan oo qabay cudurrada caqliga iy dhimirka ayaa dhibaato ku qabay inay aqoonsadaan iyo meeleynta qeybaha jirka, wax badanna kama aanay garanayn sida ay xubnahaas u shaqeeyaan.

Ka qeyb-galayaal badan ayaa garanayay cudurka HIV, balse ma aanay garanayn cudurrada kale ee ku faafa galmada. Si looga hor-tago uur-qaadista, ka qeyb-galayaasha waxay xusuusnaayeen in dadka, gaar ahaan wiilasha iyo gabdhaha ku jira xilliga qaan-gaarnimada looga baahan yahay ka fogaanshaha galmada. Kuwa ayaa sheegay in dadka looga baahan yahay isticmaalka kondam, kiniiniyo haweeneyda ay qaadan karto maalin kasta ama cirbado ay haweeneyda qaadan karto saddexdii biloodba mar. Dad aan badnayn ayaa xusay hababka kala fogaynta dhalmada, sida isticmaalka aaladda ilmo-galeenka, aalad leh qaabka T oo la galiyo minka haweeneyda; ama bir-tallaalid, bir yar oo la galiyo maqaarka hoostiisa ee gacanta sare ee dumarka. Ma jirto cid ka hadashay nadaafadda dumarka iyo ragga.

**Qaar ka tirsan hababka kala fogaynta dhalmada**

| | |
|---|---|
| Kondam<br> | Kiniini<br> |
| Duris<br> | Aaladda ilmo-galeenka<br> |
| Bir-ku-tallaalid<br> | Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka kala fogaynta dhalmada, booqo xarun caafimaad. |

**ADEEGYADA IYO MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA TARANKA**

Dad badan ayaa sheegay in hay'adaha IRC iyo Film Aid ay bixiyaan macluumaad ku saabsan caafimaadka taranka iyo galmada oo loogu talagalay dadka naafada ah, halka kuwa kalena ay xuseen hay'adaha National Council of Churches of Kenya iyo Jesuit Refugee Services.

Dadka badankood ayaa sheegay inay macluumaadka ka helaan boorarka ogaysiisyada, makarafoonnada, fiidiyowyada iyo shaqaalaha/ abaabulayaasha caafimaadka ee

bulshada. Kuwa kale ayaa sheegay inay macluumaadka ka helaan siminaarro gaar ah, madaxda bulshada, tacliinta iskuullada iyo dhaqaatiirta.

Qaar ka tirsan dadka naafada ah ayaa sheegay inay gacan ka gaysan karaan sidii ay macluumaadka ula wadaagi lahaayeen dadka kale ee naafada ah.



*Isbitaalka Weyn ee IRC* (Sawirka: IRC)

**KHIBRADDA GUUD EE HAWEENEYDA AMA GABADHA NAAFADA AH EE UUR YEELATA**

Inta badan ka qeyb-galayaasha ayaa sheegay haweenka uurka leh iyo gabdhaha naafada ah ay ku dhalaan isbitaalka, uuna qaado gaari ambalaas ah. Waxay kaloo sheegeen in seyga, qoyska ama dariska ay raacaan haweenka uurka leh.

Qaar ka mid ah ka qeyb-galayaasha ayaa sidoo kale sheegay in haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay ku dhalaan isbitaalka si ay u helaan shahaadada dhalashada.

Ka qeyb-galayaasha ayaa si guud isugu waafaqay in dhaqaatiirta ay si wanaagsan oo xushmad leh u daaweeyaan haweenka uurka leh iyo gabdhaha naafada ah, balse qaar kale ayaa sheegay in loola dhaqmo si "naxariis daran".

**CABASHOOYINKA LA XIRIIRA BADBAADADA**

Dadka naafada ah badankood waxay sheegeen inay dareemaan halis dhinaca waddooyinka ah/waddada weyn maxaa yeellay "si sahlan ayaa waxaa ugu dhici kara gaari"; duurka maxaa yeellay "ma jiro qof ku caawinaya haddii qof ama xayawaan uu ku soo weeraro"; meelaha biyaha laga dhaansado maxaa yeellay dagaal badan ayaa ka dhaca; suuqa gudihiisa maxaa yeellay ciriiri iyo saxmad ayaa ka jirta.



*Duurka* (Sawirka: IRC)

Dad badan ayaa sheegay inay dareemaan badbaado marka ay la joogaan xubnaha qoyskooda, marka ay saaran yihiin gaariga ambalaaska, marka ay joogaan isbitaalka weyn, iskuulka Don Bosco iyo saldhigga booliska, maxaa yeellay

ammaanka oo fiican dartiis sida ganjeellooyinka iyo ilaalada.

**MAXAAN SAMEYN DOONNAA HADDA?**

Hay'adaha WRC iyo IRC waxay u kuurgali doonaan macluumaadka, waxayna diyaarin doonaan warbixin dhammaystiran oo ku saabsan natiijada oo ay la socdaan talooyin (oo ay ku jiraan talooyin ay wadaageen ka qeyb-galayaasha daraasadda) oo ku saabsan sida loo horumarin karo adeegyada caafimaadka taranka iyo galmada ee dadka naafada ah ee ku nool Kakuma, Kenya. Waxaan la wadaagi doonnaa warbixinta deeq-bixiyeyaasha, hay'adda Qaramada Midoobay u qabilsan Qaxootiga (UNHCR) iyo ururrada aan dowliga ah ee caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah.

Daraasad tan la mid ah ayaa sidoo kale laga sameynayaa dalalka Uganda iyo Nepal. Waxaan natiijada saddexdan dal ku soo daabici doonnaa hal warbixin, waxaana ku qalqaalin doonnaa dowladaha, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo ururrada qaranka iyo kuwa caalamiga ah sidii loo cadaadin lahaa adeegyo caafimaad oo horumarsan oo ku saabsan taranka iyo galmada oo loogu talagalay dadka naafada ah ee ku nool daafaha caalamka.

**MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDII AAD DOONAYSO INAAD WAX BADAN KA OGAATO DARAASADDAN IYO WARBIXINTA?**

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daraasaddan, fadlan kala xiriir: Dr. Florah Bukania (071.897.4134)/ **Flora.Bukania@rescue.org**.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warbixinta oo dhammeystiran iyo ololaha WRC ee ku saabsan natiijooyinkan, fadlan kala xiriir Sandra Krause **info@womenscommission.org** ama booqo **www.womensrefugeecommission.org**.

Warbixintan waxaa qoray Sandra Krause waxaana dib u eegay Bukania, Margaret Nguhi, Alex Kalatu iyo Beatrice Rimberia. Waxaa tifaftiray Mihoko Tanabe. Sawirrada waxaa saaray Stacey Patino.

Daraasadda waxaa fuliyay Alex Kalatu (IRC); Anisa Mohamed Mohamud; Beatrice Rimberia (IRC); Chelia Rose; Jamila Ebongon; Mohammed Ibrahim Abukar; Naima Hamid Mohamed; Rita Namuremba; Simon Lotela (turjumaanka dhagoolayaasha); Sisra Abuissakomi; Yassin Abdirahman Mohamed; Yousif Manahil Sukara; iyo Zainab Mohammed (turjumaanka dhagoolayaasha).

Jan 2014